

Suuxin Goboleed

Xannibaada dareemaha darafyada qalliinka ka hor

Qoraalkani waxa uu sharxayaa suuxin gobolkeedka, oo aad heli karto qalliin ka hor. Waxa uu sheegayaa waxa la filayo, faa'iidooyinka iyo khatarta, iyo saameynta liddiga caadiga ah.

Waa maxay suuxin goboleedku?

Suuxdin goboleedka waxa la isticmaalaa daawada kabuubyada. Waxa la bixiyaa qalliinka ka hor si lagaaga ilaaliyo inaad dareento xanuun. Dhakhtar gaar ah oo la yiraahdo dhakhtarka suuxdinta (anesthesiologist) ayaa daawada ku duri doona meesha qalliinka lagu sameynaayo.

Xannibaada neerfaha darafyada waa nooc ka mid ah suuxin goboleedka. Waxa kale oo loo yaqaan *xannibaad goboleed* ama *xannibaad neerfeed*. Xannibaadahan waxaa badanaa la bixiyaa ka hor qalliinka garabka, cududda, gacanta, lugaha, ama cagaha. Waa sida nooca suuxinta ama kabuubyenta ee la bixiyo ka hor inta aan la samayn shaqada ilkaha.

Ma soo jeedi doonaa inta lagu jiro qalliinka?

Waxaa laga yaabaa inaad doorato inaad soo jeedo inta lagu jiro qalliinka. Haddii aad doorato inaad soo jeeddo, waxa laga yaabaa in lagu siiyo *daawo dejineed* (sedative) oo kaa caawinaysa inaad nasato. Tan waxa loo yaqaan *suuxdin miyir leh*.

Dhakhtarka suuxinta ayaa kaala hadli doona suuxinta saxda ah ee adiga kugu habboon. Haddii lagu siiyo:



Xubin ka mid ah kooxdayada suuxinta oo siinaya bukaanka xannibaadda neerfaha.

- **Suuxinta ugu yar**, Waxaad dareemi doontaa nasasho, laakiin waxaad awoodi doontaa inaad ka jawaabto su'aalaha oo aad raacdo tilmaamaha xilliga qalliinka.
- **Suuxin dhexdhedaad ah**, Waxaad dareemi doontaa lulo inta lagu jiro hawsha. Waxaa laga yaabaa inaad inteeda badan hurdo. Laakin, dhakhtarkaagu wuu ku toosin karaa si uu kuula hadlo. Waxaa laga yaabaa inaad xusuusato ama aanad xasuusan inaad joogtid qolka qalliinka.
- **Suuxdin qoto dheer**, Waad hurdi doontaa inta lagu jiro baroosijarka. Waa yar baad xusuusan doontaa ama maba xusuusan doontid joogitaanka qolka qalliinka. Neefsashadu waa yaraan kartaa. Waxaa laga yaabaa inaad hurudo inta daawadu kaa baxayso.

Ma heli doona daawooyin kale inta lagu jiro qalliinka?

Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo suuxdin goboleed iyo mid guud labadaba. Suuxdinta guud waxay saamaysaa jirka oo dhan. Inta badan, waxaa lagu bixiyaa iyada oo loo marayo khadka xididka (IV) ee gacantaada. Waxa laga yaabaa in la bixiyo haddii sababta ugu weyn ee suuxdin goboleedku ay tahay in la xakameeyo xanuunka qalitaanka ka dib. Haddii lagu siiyo suuxdin guud, waad hurdi doontaa inta lagu jiro qalliinka.

Haddii lagu siiyo labada nooc ee suuxdinta ahba, dhakhtarkaaga suuxinta ayaa laga yaabaa inuu isticmaalo suuxdin guud oo yar. Tani waxay kaa caawin kartaa inay soo dedejiso soo kabashadaada.

Waa maxay faa'iidooyinka xannibaad goboleedku?

Marka la barbar dhigo suuxinta guud, badankooda bukaanada leh xannibaadaha goboleed:

- Waxay leeyihiiin lalabo yar
- Dhaqso u soo toosid
- Dareemid daal yar ama xanaaq yar

Waa maxay khataraha suuxin goboleedku?

Dhammaan dawooyinka iyo baroosijarada caafimaadku waxay ku lug leeyihii khataro. Qaar ka mid ah khataraha suuxin goboleedka ayaa ah:

- Xannibaada oo shaqeyn weyda, waxaa loo baahanayaa irbad dheeraad ah in lagugu duro
- Nabar ama dhiigbax goobta duridda
- Kabuubyo ama jiriirico socota dhowr maalimood
- Caabuqa/Infekshan
- Dhaawac neerfaha ah

Inta lagu jiro qalitaanka, waxaanu si dhow ula socon doonaa calaamadahaaga muhiimka ah. Waxaanu la socon doonaa heerka garaaca wadnahaaga, cadaadiska dhiigga, iyo heerka ogsijiin iyo isbeddel kasta.

Waa maxay saameynta waxyeelo ee qaadashada suuxinta?

Ka eeg bogga 3 liiska saameynta waxyeellooyinka/liddiga caadiga ah, dhifka ah, iyo kuwa aad dhif iyo naadirka u ah oo ku dhici kara bukaanada qaata suuxin goboleedka iyo suuxinta guud. Kala hadal dhakhtarkaaga suuxdinta haddii aad wax su'aalo ah ka qabto saameynta waxyeelooyinka lidka ku ah.



Su'aalaha la Weydiyo Qalliinka ka hor

Isticmaal booskan si aad ugu qorto wixii su'aalo ah ee aad rabto inaad weydiiso dhakhtarkaaga suuxinta.

Saameynata Liddiga caadiga ah

Saameynahan liddiga ahi waxay ku dhacaan 1 ilaa 10 ka mid ah 1000-kii ee bukaanba.

Saameynata Liddiga ah	Suixin Goboleedka	Suuxinta Guud
Dareen jirro iyo matag		X
Cune xanuun		X
Dawakhaad, aragti haydh-haydha	X	X
Madax xanuun		X
Cuncun		X
Xanuun, dhabar xanuun	X	X
Nabar iyo xanuun ka yimaada duritaanka	X	X
Jahawareer, dhibaatooyin xusuusta ah		X

Saameynata Liddiga ah ee dhifka ah

Saameynahan liddiga ahi waxay ku dhacaan 1 ka mid ah 1,000-kii ee bukaanba.

Saameynata Liddiga ah	Suixin Goboleedka	Suuxinta Guud
Infekshanka laabta		X
Muruq xanuun		X
Dhibaatooyinka neefsashada (inta lagu jiro qalliinka ama ka dib)	X	X
Dhaawac soo gaadha ilkaha, dibnaha, iyo carrabka		X
Xaalad caafimad oo jirta oo ka sii darta	X	X
Soo toosid xilliga qalliinka		X

Dhibaatooyinka aad dhif iyo naadirka u ah

Dhibaatooyinkani aad bay dhif u yihiin. Waxay ku dhacaan 1 ka mid ah 1,000-kii ilaa 1 ka mid ah 100,000-kii ee bukaanba.

Saameynata Liddiga ah	Suixin Goboleedka	Suuxinta Guud
Dhaawac isha ah		X
Xasaasiyad/alerji halis ah	X	X
Dhaawac neerfaha ah	X	X
Qalabka oo xumaada/shaqeyn waaya	X	X
Dhimasho	X	X

Maxaan filan karaa markaan helo suuxdin goboleedka?

- Marka hore, waxaa lagugu samayn doonaa iskaanka ultrasound. Ultrasound ku wuxuu isticmaalaa mawjadaha dhawaaqa si uu u muujiyo gudaha jirka. Iskaankani waxa uu u ogolaanayaa dhakhtarka suuxinta inuu arko meesha ugu fiican ee lagu duro daawada kabiubyada.
- Inta badan, bukaanku wuxuu u baahan yahay 1 irbad oo keliya oo daawada ah.
- Bukaanada intooda badani waxay leeyihiin 4 ilaa 24 saacadood oo xanuun baabi'in ah qalliinka ka dib. Tani waxay ku xiran tahay daawada la isticmaalay. Dhakhtarkaaga suuxinta ayaa kaala hadli doona waxa aad filan karto.

Ka waran xanuun yaraynta qalliinka ka dib?

Marka loo baahdo xanuun baabi'in muddo dheer ah qalliinka ka dib, kateetarka xannibaadda neerfaha (tuubo yar) ayaa la gelin karaa. Tuubadani waxay noo ogolaanaysaa inaan si joogto ah (socota) ugu dirno qulqulka daawada xannibaadda neerfaha koox gaar ah oo neerfaha ah.

Marar badan, kateetarada xannibaadda neerfaha ayaa u shaqeeya si ka fiican daawooyinka xanuunka opioid-ka. Waxay bixiyaan xakameynta xanuunka oo ka fiican waxayna caawiyaan soo kabashada si degdega ah.

Haddii aad leedahay kateeter, Kooxdayada Maarataynta Xanuunka Ba'an ayaa maamuli doona kateetarkaaga iyo daawooyinka kale ee xanuunka. Kooxdan ayaa ku soo booqan doonta maalin kasta inta aad isbitalka ku jirto.

Maxaan filan karaa qalliinka ka dib?

- Waxaa laga yaabaa inaad awoodin inaad dhaqdhaqaajiso gacantaada ama lugtaada ilaa ay xannibaada neerfuhu kaa baxdo. Isla neerfaha u soo dira signalka xanuunka maskaxdaada ayaa sidoo kale u dira signal si ay murqahaagu u dhaqaaqaan.
- Xannibaada neerfaha ayaa tegi karta wakhti kasta oo maalin ama habeen ah. Si aad uga fogaato xanuun daran marka uu sii dhamanaayo, sii wad inaad qaadato daawooyinka kale ee xanuunka sida laguugu qoray.
- Markaad guriga tagto, gacantaada ama lugtaada ayaa laga yaabaa inay weli kabuubyo leeyihiin oo aad dareetid culeys. Maadaama oo aanad dareemi karayn xanuun:
 - Qaado taxadar dheeraad ah si aad lugta ama gacanta uga ilaalso dusha meel kulul amase qabow.
 - Ha saarin cadaadis xubintaada kabuubyeysan.
 - Haddii lugtaadu kabuubyeysan tahay, qaado taxaddar dheeraad ah si aadan u dhicin. Waxaa laga yaabaa inaan ku siino haye (sling) ama dhejis (brace), haddii loo baahdo.

Su'aalo?

Su'aalaahaagu waa muhiim. Wac dhakhtarkaaga ama bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii aad wax su'aalo ah ka qabto xannibaadda dareemaha.

Adeegga Suuxin Goboleedka ee Harborview. Wac **206.999.0992** maalmaha shaqada laga bilaabo 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo. Daryeelka degdega ah **keliya** saacadaha shaqada kadib iyo dhammaadka wiiga iyo maalmaha fasaxa ah, wac 206.520.5000.

Xarunta Caafimaadka ee UW - Adeegga Suuxin Goboleedka ee Montlake. Wac **206.598.0540** maalmaha shaqada laga bilaabo 8 subaxnimo ilaa 4 galabnimo.